Burlövs kommun

Somaliska

# Barashada afka hooyo ee degmada Burlöv

## Muxuu u baranayaa cunuggaaga afka hooyo?

Waxaa jira taageero ballaaran oo ka dhex jirta cilmi-baarista arrimaha dugsiga waxana ka mid ah cilmi-baarayaasha caanka ah sida Jim Cummins, Ofelia Garcia iyo Gudrun Svensson in ardayda haysato aqoon horumarineed ee afkooda hooyo ayaa hela natiijo sare, aadna u barto afka iswidhishka iyo maaddooyinka kaleba si dhaqso leh.

Afka hooyo wuxuu muhimad weyn u leeyahay caruurta xagga luqadda, aqoonsiga, shakhsiy-adda iyo horumarka fikirka. Afka hooyo oo hor-umarsan ayaa siinayo fursad wanaagsan inuu barto afka iswidhishka iyo maaddooyinka kale.

## Yaa xaq u leh inuu akhriyo afka hooyo?

Dhigashada afka hooyo waxaa lagu habeeyay sharciga dugsiyada cutubka 10aad qodobkiisa 7aad:

Arday leh waalid oo leh af aan ahayn iswidhish waxaa la siinayaa barashada afka hooyo ee luqadda haddii luqaddu tahay tii maalinlaha u isticmaalo xagga guriga isla markaana ardayga uu leeyahay aqoonta asaasiga ah ee afka. Ma ahan ardayga in uu yahay mid luqad cusub baranayo.

Dhigashada afka hooyo looma habeynaayo sidii luqad bilow ah.
Sida ku xusan qaanuunka dugsiyada arday wuxuu keliya baran karaa luqad sidii afka hooyo, iyadoo loo eegayn inta luqadood ee ardaygu ku hadlo af hooyo ahaan.

Ca-ruurta la korsadu waxay xaq u leeyihiin dhigas-hada afka hooyo haddii xitaa luqaddu ahayn luqadda maalinlaha.

## Waxyaalaha kale ee ardaydu inay yaqaana-an laga rabo waa:

### Fasallada 1–3 ee dugsiga hoose

- Adayga inuu fahmi karo tilmaamaha fudud, sidoo kale wada-hadallada gaaban iyo kuwa fudud ee ku habboon da`da ardayga.
- Ardayga inuu dhihi karaa jumladaha caadiga ee afka hooyo.
- Ardayga wuu garanayaa xarfaha luqadda

### Fasallada 4–6 ee dugsiga hoose

- Ardayga wuxuu horumariyay afkiisa hooyo oo firfircoon xagga eray-bixinta oo ku habboon da`diisa.
- Ardaygu wuxuu ku soo bandhigi karaa afkiisa hooyo hab fudud oo wuxuu ka sheegi karaa waxyaabaha maalin kasta dhaca sida qoyska, dugsiga, waxa uu xiiseeyo.
- Ardayguba wuxuu akhrin karaa qoraallo iyo weero sahlan oo ku habboon da`da ardayga.
- Ardaygu wuu qori karaa qoraal gaaban

### Fasallada 7–9 ee dugsiga dhexe

- Ardaygu wuxuu oraah ku sheegi karaa afkiisa hooyo.
- Ardaygu wuxuu akhrin karaa qoraallo kala duwan oo ku fac luqadeed ah oo fahmi karo nuxurka.
- Ardayga wuu la qori karaa qoraallo noocyo kala duwan leh ardayda kale kuna saleysan da`da

## Barashada afka hooyo ee dugsiga

Degmadu waxay ku qasban tahay inay abaa-busho barashada afka hooyo haddii ay ku jiraan ugu yaraan shan arday ee dugsiga hoose/dhexe oo lana heli karo macallin ku habboon. Luqadaha laga tiro badan yahay sida romani jib, finishka, saami, yiddish iyo menkeli waxaa lagu qabanqaabiyaa ardayda oo diiwaangashan.



Hadafka degmada Burlöv waa in dhammaan barayaasha afka hooyo ay haystaan aqoonsiga macallinimo.

Barashada afka hooyo waxaa loo abaabulaa waqti ka baxsan saacadaha dugsiga waxana laga yaabaa inay ka dhacdo dugsi ka duwan kan degmada.

**Wargelin/codsi**
Ka mas'uul ahaan ama ka waalid ahaan waxaad ku diiwaangelineysaa ilmahaaga dhigashada afka hooyo qaab adeegga elektaroonikada.

e-tjanster.burlov.se/modersmalsansokan

Ka hor sannad-dugsiyeedka cusub, waa in la soo gudbiyaa codsiga ugu dambeyn 1 may.

Waxaan doorbideynna in dhammaan codsiy-ada cusub ee fasallada 1–9 ay dhacaan ka hor 1 may, laakiin waa la aqbalayaa codsiyada sannadka oo idil

**Joogitaanka iyo maqnaanshaha**
Maaddada afka hooyo waa ikhtiyaari, laakiin haddii la dalbado dhigashada waa khasab. Baraha afka hooyo ayaa maqnaanshaha ardayga u gudbinaayo waalidka qaab sms, meyl, ama "V-klass".

**Shahaado**
Shahaadooyinka waxaa la siiyaa fasallada 6- 9 iyo dugsiga sare. Aasaaska shahaadada lagu saleeyo waxay qeexaysaa shuruudaha si loo helo shahaado gaar ah. Arday haddii uu helin ugu yaraan shahaadad E, waxaa macluumaadka xaaladda shahaado loo dirayaa waalidka ka hor shahaado dejinta. Qiimeynta waxaa la bixiyaa mar xillidugsiyeedkiiba iyadoo aan loo eegin fasalka.

Burlövs kommun




# Vklass

### Gelid

Ku gal magaca isticmaalaha iyo ka sirta kuu ah adiga oo adeegsanaya abbka iyada oo loo maraayo Vklass:
***burlov.se/skolportal***

Vklass waxaa loo isticmaalaa sida kanaalka macluumaadka ee maamulayaasha, macallimiinta ee degmada.

Ka mas'uul ahaan waxaad ka qayb qaadan kartaa natiijooyinka iyo qiimeynta ardayga kahor marka lala yeelanaayo wada-hadalka waxbarasho. Waxaa inta badan lagu ballansadaa qaab Vklass.

### Jadwal-taariikh/Jadwal

Waxaa halkaani laga helaa jadwalka dugsiga ee cunuggaaga dhigta waxaa ku jira waxqabadyada kale sida layli, shaqo-guri, imtixaanno, fasaxyo, ballamo khuseeyo wada-hadalka waxbarasho, rixlooyin, qoorshooyin waxbarasho oo carruurta ku hawlan yihiin hadda.

### Isgaarsiin

Isgaarsiinta dugsiga waa habka meylka. Markaad farriin dirayso waxaad u soo diraysaa qaab meyl, kaas oo markiiba kuu soo jawaab-celin karo. Sidaa awgeed waa muhiim inaad Vklass ku leedahay meyl ku diiwaangashan.

### Wargelin-maqnaansho

Macnaha guud waa inaad ka warbixiso maqnaanshaha maalinta oo idil oo ku taariikhaysan. Ma jeceshahay inaad diiwaangeliso maalin kale sida ballan aad la leedahay dhakhtarka ilkaha bartamaha maalin gudaheeda, waxaad dooran kartaa " xilli kale

## Bogga dugsiga

Waxaad bogga dugsiga ka helaysaa ka mas'uul ahaan macluumaad uruursan oo ah nidaamyada aad u baahan tahay inaad raacdo ama aad ka qayb qaadato sida waxbarashada ilmahaaga, wargelinta maqnaanshaha iyo wax intaa ka badan. Waxaa ku jira bogga dugsiga uu leeyahay hab gaaban oo lagu heli karo macluumaadka oo ku saabsan jadwalka cuntada dugsiga, xilli-dugsiyeedka iyo fasaxyada.

***burlov.se/skolportal***